

Warqada Tallada Kuleel Daran

Inta lagu jiro muddooyinka kuleelka daran, dadka waa in ay ka taxadaraan inay ka hortagaan jirada kuleelka la xiriirto. Qabow ahow, biyo cab, oo ka warhay.



Jirkaaga fuuq ha ku jiro

- Cab dareere badan, gaar ahaan biyaha, maalinta oo dhan
- Ha sugin ilaa aad ka oonto kahor inta aadan cabitaan cabin (aan ka aheyn haddii dhaqtarkaaga kugula taliyo inaad yareysid qaadashada biyaha)
- Ka fogow cabidda khamriga
- Ka fogow cabitaanada uu ku badan yahay sonkorta iyo kafeega
- Ka fogow cabitaanada aadka u qabow — waxay sababi karaan calool xanuun



Qabow ahow

- Booqo meelaha leh qaboojiye (tusaale ahaan, moolalka, naktabadaha) haddii uu gurigaagu kululyahay
- Ha isticmaalin marwaxadaha korontada si aad isugu qaboojisid markii heer kululka gaaro 90'meeyo iyo ka kor — ku afuufidda aariyada jirkaaga ee ka sarreeyo heerkululka jirkaaga waxay dhabtii kordhin kartaa daqdiga kuleelka
- Xiro dhar midibo qafiif ah, oo dabacsan
- Ka fogow jimicsiga bannaanka inta lagu jiro saacadaha kulul ee maalinta (sida caadiga inta u dhaxeeyso 10:00 a.m. iyo 5:00 p.m.)
- Qaado qubeys qabow ama qubeyska saxniga




Ka warhaay

- Dhageyso maalin walba warka deegaanka ee cimilada oo ku beeg howlahaaga sida muhiimka ah si aad badbaado ugu joogtid kuleelka
- Ogow aastaamaha jirrada kuleelka la xiriirto; u diyaar garow in aad qaadid qiyaasaha badbaadada iyo gargaarka koowaad
- Hel warbixinta caafimaadka iyo badbaadada ee ka imaaday waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga

Aastaamaha daalka kuleelaha

Aastaamaha faalijka kuleelka



Aastaamo badan ee daalka kuleelka wuxuu keeni karaa aastaamaha faalijka kuleelka. Markii shaki kugu jiro, soo wac 9-1-1.

Waxa la sameeyo

Aad meel qabooban
Jooji dhammaan howlaha,
isku qabooji barafka/biyaha qabow, oo jiifso
Cab biyo qabow ama cabitaanada ciyaaraha
Soo wac 9-1-1 haddii aastaamaha ay socdaan wax ka badan 1 saac

Soo wac 9-1-1 islamarkiiba
U dhaqaaji qofka ay saamaysay goob hadh leh ama qabooban
Ku qabooji qofka ay saamaysay oo ku rid biyaha qabow ama geli
bacaha barafka ee qoorta iyo aagaga gumaarka

Haddii ay tahay inaad bannaanka ka joogtid kuleelka:

- Ka fogow jimicsiga bannaanka inta lagu jiro saacadaha kulul ee maalinta (sida caadiga inta u dhaxeeyso 10:00 a.m. iyo 5:00 p.m.)
- Ka fogow jimicsiga culus
- Haddii ay tahay inaad jimicsito, qaabeey shaqsigaaga
- Cab biyo badan
- Ku naso inta badan hooska ama dhismo qaboojiye leh

Ku caawi dadka kale inay badbaado ka ahaadaan kuleelka daran:

- Hakaga tagin carruurta ama xayawaanada gaari, xitaa haddii daaqada jab ay ka furantahay oo gaariga ka meel hoos leh yaallo!
- Ka fiiri dhallaanka, carruurta, iyo waayeelka si joogto ah calaamadaha ama aastaamaha jirada kuleelka la xiriirto.
- Ku dhiirgeli saaxibada iyo qaraabada inay eegaan qoyska iyo dariska ee laga yaabo inay halis badan ku jiraan, gaar ahaan kuwa kaligood nool si loo hubiyo inay qaboobanyihiin oo ay qoyanyihiin.
- Kormeer dadka qabo xaaladaha caafimaadka oo laga yaabo inay halis badan geliso saameynada xun ee kuleelka daran. Xaaladaha caafimaadka daran qaarkood, sida sonkorta ama cudurada kelida, waa ka sii dari karaan goorta kuleelka.

Ma u baahantahay macluumaad badan?

Booqo websaydkeena: Qorsheynta dhacdooyinka kuleelka daran - www.health.mn.gov/heatplanning
Xogta kuleelka daran ee Minnesota - www.health.mn.gov/heatdata

Si toos ah noola soo xiriir: Limeelka - health.climatechange@state.mn.us
Taleefonka - 651-201-4991